



Dawlada Deeganka Somaalida
Maxkamada Guud ee Shareecada
Warbixinta Waxqabadka Maxkamada Shareecada Heerarkeeda Kala Duwan Ee
Qorshaha S.M.2015

Jig-jiga

2015 T.I

Tusmo

HORDHAC	3
1. Isbar-bardhig Guud ahaan Tirada Faylasha Laga Furay Maxkamadaha Shareecada Afartii Sano Ee La Soo Dhafa	4
2. Tirada Faylasha laga furay Maxkamad kasta oo faah-faahsan s.m2015	5
3. Waxqabadka S.m 2015 I.T oo Faah faahsan	7
3.1. Kobcinta Aqoonta iyo Wacyiga Qaadiyada.....	7
4. Dabagalka iyo Kormeerada.....	9
5. Shaqooyinka Laqabtay Ee Xidhiidhka Laleh Waxda Qaadiyada	10
7. Shirka kor uqaadida wacyiga culumada	11
8. Garab istaaga Ciidanka Xooga gaarka ah ee DDS.	11
9. Safarada dalka dibadiisa ee Taageero dhaqaale iyo mid khibrad isweydaasiba loogu raadinayay Maxkamadaha shareecada	11
10. Safarka Djabuuti	12
11. Qaabilaada wafdigii ka socday soomaali land	12
12. Qaabilaada wafdi ka socday Jaamacada Africa Ee Dalka sudan	12
13. Waxyaabaha kale ee sanad miisaaniyeedkan qorshaysnaa lana fuliyay.....	12
14. Shaqooyin dheeri ah oo la hirgaliyay	13

HORDHAC

Maxkamadaha Shareecada Degaanku waxay ahaayeen kuwo si rasmi ah u jiray tan iyo markii Diinta Islaamka laga qaatay Waddanka Ethiopia. Waxaa iyada oo laga duulayo Dastuurka Federaalka & kan Degaankaba la xoojiyay sannadkii 1995 aasaaskeeda, awooddeeda & qaab-dhismeedkeedaba, laguna xoojiyay Bayaanka tirsigiisu yahay 39/95. Ka dib Isbadalkii Dalka & Degaankaba ka hanaqaadey ayaa Maamulka Maxkamadda

shareecadu qorsheeyeen in Maxkamadaha shareecada Dib loo aas- aaso maaddama xeerkaa hore aanu la jaanqaadi karin heerka ay Maxkamadaha shareecadu marayaan. si loo suurto galiyo habsamida geeddi-socodka shaqo ee u garsooridda shacabkeenna guud ahaan, ayaa waxaa loo baahday in dib loo qeexo awoodaha, waajibaadka iyo hab-shaqeedka Maxkamadaha Shareecada DDS. Waxaana dib loogu aasaasay Bayaanka Tirsiga **190/2012 T.I.**

Sidoo kale, waxaa bayaankaas lagu dhisay Guddiga Maamulka Qaadiyada DDS, kuwaas oo guda galay waajibaadkoodii.

Maxkamadaha Shareecada DDS Waxay adeeg u fidiyaan Macaamiisha danaha ka leh, waxaana loo idmaday Xalinta Arrimaha Qoyska hab waafaqsan shareecada Islaamka, sidoo kale waxay hiigsanayaan sidii ay kor ugu qaadi lahayd sugidda xuquuqaha kala gedisan sida xuquuqda lamaanaha, xanaanada ciyaalka, Dhaxalka dumarka iwm.

Hadaba, iyadoo laga duulayo qorshe miisaniyadeedkii 2015, ayaa qoraalkan hoose waxaa lagu soo koobay waxqabadkii Maxkamada shareecada u qabsoomay 10kii bilood ee sanadkan.

1. Isbar-bardhig Guud ahaan Tirada Faylasha Laga Furay Maxkamadaha Shareecada Afartii Sano Ee La Soo Dhafa

Sanadka	2013	2014	2015
Wadarta Guud	10,287	9,516	11,523

F.G

Kiisaska Maxkamadaha shareecadu way yareen 2014 , sababtoo ah waxaa ka jiray deegaanka Abaar daran .

2. Tirada Faylasha laga furay Maxkamad kasta oo faah-faahsan s.m2015

No.	Magaca maxkmada	Wadarta	Go, aan helay	socota
1)	Maxkamda guud ee sharaacada	443	443	==
2)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka faafan	3,759	3,631	152
3)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Siti	781	641	147
4)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Liiban	958	924	34
5)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Jarar	1267	1267	==
6)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Shabeele	1,329	1290	29
7)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Daawa	416	416	==
8)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Doolo	281	263	18
9)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Afdheer	718	689	29
10)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka qoraxay	580	515	65
11)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalka Nogob	603	603	==
12)	Maxkmada Sare ee sharaacada gabalk Erar	363	335	28
<u>Wadarta guud</u>		<u>11,519</u>	<u>11,017</u>	<u>502</u>

2.1. Faah-faahinta DACWADAHA & DAKHLIGA KA SOO XEROODAY

QS 2015, wadarta guud ee dacwadaha soo galay Maxkamadaha Shareecada DDS waa **11,523** Gal-dacwadeed, waxaana go'aan helay **11,017**. Inta u gudubtay QS 2016 ay tahay **502** , taas oo noqonaysa in la go'aamiyey **96.%** Dacwadahaas sare waxa ay ka kooban yihiin:

- ☞ Xuquuq (Masaariif, Xannaano Caruureed, iyo Meherka dumarka) 5,682 (49.3%)
- ☞ GUUR 3,475 (30 .1 %)
- ☞ FURIIN (Cadeyn furiin oo ka dhacay maxkamada dibadeeda yay u bdanyihiin) 1, 910 (16 %)
- ☞ DHAXALKA 248 (2.1%)
- ☞ Kiiaska Sugidda Nasabka, Hibada, Qofka la waayo, & Waqafka 23 (0.2%)

Xogta Dakhliga Ka Soo Xerooday Kiisaska

Tirsiga	Magaca maxkamada	Dakhliga
1.	Maxkamada guud ee shareecada DDS	217, 650
2.	Max. shareecada Gobalka faafan	1,692,890
3.	Max. shareecada G.Siti	134 ,295
4.	Max. shareecada G.Jarar	471,930
5.	Max. shareecada G.Liiban	377,661
6.	Maxshareecada G.Qoraxay	463,005
7.	Max. shareecada G.shabeele	600,770

8.	Max. shareecada G.Erar	123,930
9.	Max. shareecada G.Afdheer	215,700
10.	Max. shareecada G.Daawa	79,250
11.	Max. shareecada G.Nogob	2,52,347
12.	Max. shareecada G.Doolo	334,370
Wadarta		4, 963,798

3. Waxqabadka S.m 2015 I.T oo Faah faahsan

Iyadoo laga duulayo qorshe sanadeedkii lagu ansixiyay Kalfadhigiilaad ee Maxkamadaha shareecada ee qabsoomay -- ----- kaas oo ku saleysanaa Miisaniyadii Maxkamadaha shareecada loo ansixiyay **S.M. 2015** , ayaa waxaa waxaa u qabsoomay howlo muhiim u ah geedi socodka shaqada maxkamada kana turjumaya baahida Bulshadeena waana sidan hoose:

3.1. Kobcinta Aqoonta iyo Wacyiga Qaadiyada

Kadib Natiijooyinkii laga soo saaray kormeeradii iyo Qiimenadii **2013** iyo **2014T.I** ee lagu sameeyay Maxkamadaha shareecada laguna soo ogaaday gol duleelooyinka Xirfadlayaasha Ka hawl gala Maxkamada shareecada , ayaa waxaa la siiyay (**227**) tababaro xidhiidh la leh habka Dacwadaha loo qaado , iyo Qaababka loo maareeyo faylasha maxkamada, anshaxa Qaadiyada iyo xeerka qoyska ee shareecada Islaamka, Anshaxa ,waajibaadka iyo xuquuqda Shaqaalaha. Sidoo kale waxaa jirra tababaro laga hellay bah wadaagta iyo tababaro ay fuliyeen maxkamadaha gobaladu waxaana ka faa iidaystay (207 .) xubnood

☞ (Wadarta Guud 434)

Faah faahinta ka fiiri shaxda koobaad iyo shaxda labaad ee qoraalka hoose:

Shaxda Faahfaahinta Tababarada Maxkamada Guud qabtay

Tr.	<u>Tababarada/ Waxbarashada</u>	Tirada qorsheeyay	la Tirada ka fa'adaysayaasha
1.	Tababarka habka geeddi-socodka dacwadaha, anshaxa garsoorka iyo xeerka qosyka ee shareecada Islaamka.	62	62
2.	Tababarka Anshaxa waajibaadka iyo xuquuqda Shaqaalaha	64	60
3.	Tababarka hanti dhawrka gudaha iyo maamulka Hantida.	72	72
4.	Waxbarasha garsoorka xiliga Fasaxa	33	33
Wadarta Guud		231	227

- **Tababarada Laga Helay Bahwadaagta iyo Tababarada Maxkamadaha sare ee Gobaladu qabteen .**

Tr	<u>Jihada Bixisay</u>	<u>Tirada ka fa'ideysatay</u>
	Uurka Qaneenada Haweenka Ethiopia	1
	Xaf. Adeega shacabka	9
	Xaf. Maaliyada	3
	Ethiopian Human rights Komishin	8
	Komishinka Anshaxa & la dagaalanka Musuqa	11
	Xaf. Dakhliga	1

	Hay'ada DRC	1
	Gollaha Xildhibaadana	1
	Xaf. Arrimaha Haweenka	2
	Xaf. Dhaqanka iyo dalxiiska	2
	Wakaalada iibka iyo hantida	2
	Maxkamada sare ee shareecada G.Doolo	38
	Maxkamada sare ee shareecada G. liiban	32
	Max. sare ee shareecada G. Erar	7
	Max.sare ee shareecada G.Faafan	14
	Maxa sare ee shareecada G. Af-dheer	75
Wadarta Guud		207

4. Dabagalka iyo Kormeerada

Iyada oo kormeerka iyo dabagalka Qaadiyadu yahay mid joogta ah , ayay Maamulku waxay Qorsheeyeen in sanadkan laba jeer lagu sameeyo kormeer 11 gobal iyo Heerdeegaan. Kormeeradan , ayaa waxaa lagu ogaadaa habka geedisocodka shaqo ee maxkamadaha sidoo kalana lagu saxaa dhamaan khaladaadka adeeg ee jira . Wayna qabsoontay kormeerka ladisii qayboodba waxaana lasoo kormeeray 10 Gobal iyo degmooyinka hoosyimaada.

Waxaan suurtagalin in la kormeero gobalka Dawa arrimo amini oo jira darteed .

Liiska Gobalada Wajigii 1aad la komeeray

- ☞ Afdheer
- ☞ Liiban
- ☞ Jarar
- ☞ Faafan
- ☞ Qoraxay.

Gabalada Wajigii 2aad la kormeer

- ☞ Siti
- ☞ Erar

- ☞ Doolo
- ☞ Heerdeegan
- ☞ Shabeele

Ujeedooyinka kormeerka iyo Qiimeenadan laga leeyahay

ujeedooyinka guud ee laga leeyahay kormeeradan waxaa kamid ah :

- In baadhis qodo dheer lugu sameeyo faylasha maxkamadaha kuwa socda iyo kuwa dhamaadayba, si loo xaqiijiyo tayada go'aan-siinta .
- in laga jawaabo cabashooyinka bulshada lana xaqiijiyo hufnaanta adeega
- In la sameeyo abaal marinno iyo dhiirrigalino loo samaynayo xubnaha Qaadiyada iyo xirfadleyaasha kale ee ku sifoobay shaqo wanaag, dhawr-soonaanta muujiyay mudadii ay bixinayeen adeega

5. Shaqooyinka Laqabtay Ee Xidhiidhka Laleh Waxda Qaadiyada

Fadhiyadii uu yeeshay Gudiga Maamulka Qaadiyada shareecadu Waxaa la magacabay , la badalay , la dalacsiiyay ama hoos-loogu dhigay, ama le eryay tirada xubnahan hoose :

- ☞ Tirada Guud ee Magacabista sanadkan (27)
- ☞ Tirada Guud Dalacada , badalada & hoos-udhigidu waa (**16**)
- ☞ Tirada xubnaha shaqada laga qaadey ama iskood ooga tagayna waa (**13**)
- ☞ Waxaa sanadkan qaatay **digniino qoraal ah (12) xubnood**

Wadrta Guud : 68

6. Shirwayne Cilmiyeedka Afaraad Ee Cidhibtirka caadooyinka Xunxun Ee Lidka ku Ah Arimaha qoyska.

Shir waynahan oo ah kii afaraad ayaa waxaa sanadkan lagu qabtay magaalada jigjiga , waxaana ka soo qaybagal dad ka badan 200 ruux . Shirkan ay maxkamada guud ee shareecadu soo agaasinto isbdalkii kadib ayaa lagu soo bandhigay dhibaatooyin fara badan iyo dhaqamo xun xun oo lid ku ah arrimaha qoyska iyo xuquuqda adamaadaha .shirakan ujeedada guud ee laga leeyahay ayahy waa , In laga tashado sidii looga hortagi lahaa dhamaan dhaqamada iyo caadooyinka xun xun ee dhibaataada ukeen san haysa jiritaanka iyo nabad qabka qoyska iyo bulshadaba. Shirkan oo malin labadeeda galin socoday ayaa waxaa lagu soo bandhigay arrimahan hoose:

- Dumarka iyo Islaamka : waaqica dhabta ah iyo Tuhmooyinka casriga ah
- Caadada somalida iyo saameynta ay ku leedahay xuquuqda dumarka
- Xuquuqda ciyaalka iyo xanaanadooda
- Lahaansha dhulka iyo sameenta uu ku leeyahay nolsha guud (dhaxalaka) .

Gaba-gabadii shirkan waxaa ka soo baxay baaq iyo natiijooyin muhiim ah:

- Dumaasha khasabka ah

- Yaradka guurka lagu xidhayo
- Gabdhaha dhaxalka loo diido
- Guurka qaaliyoobay sidii loo jabin lahaa
- Dayca ubadka iyo reerka si macno daro ah loo bur buriyo

7. Shirka kor uqaadida wacyiga culumada

Kadib markay kooxda xagjirka ah ee xanbaarsan fikradaha guracan ay deegaanka kusoo qaadeen duulanka fooshaxumaa, Ayay maxkamada shareecadu qabatay shirar wacyi galineed dhamaan gobalada iyo dagmooyinka deegaanka shirarkaas oo lagu bayaamin hayay xaqiiqda iyo wajiga dhabta ah ee ay leeyihiin kooxda AL-Shabaab tasoo ah inayna diinta shaqa ku lahayn diinta Islaamkuna ay bari katahay waxay ku kaceen.

8. Garab istaaga Ciidanka Xooga gaarka ah ee DDS.

Iyadoo laga duulayo qorshihii deegan ahaan la qaatay ee ahaa in kooxda Al-shaab af iyo adinba in lala dagaalamo , ciidankeenana la garab istaago , ayay Maxkamadu Maamul iyo shaqaaleba isla qaateen in mushaarka %3 lagu deeqo ciidanka gaarka , waxaana xafiiska nabad galiyada lagu wareejiyay lacag dhan **2000,000,000** (labo milyan oo bir)

9. Safarada dalka dibadiisa ee Taageero dhaqaale iyo mid khibrad isweydaasiba loogu raadinayay Maxkamadaha shareecada

Tariikhdu markay ahayd **10.01.2023** , ayay Maxkamadu waxay safar u taktay dalka Sucuudi Arabia , kadib markay ka heshay fudeydin arrimaha safarka Golaha sare ee Arrimaha Islaamka dalka. Safarkan oo ujeeda kowbaadi ahayd in taageero dhinac walba laga helo hay'adaha islaamka ee dalkaas iyo mu'asaadka airman ka shaqeeya , waxaana suuragashay in kullamo resmi ah maamulku la yeeshay mu'asaad badan sida Dalada isku xidhka dunida Islaamka / *رابطة عالم الاسلامي*, Hay'ada Dhalinyarta Islaamka *الندوة العالمية* : *للشباب* , iyo Hay'ada Qabas ee Arrimaha Garsoorka . *جمعية قيس القضائية* . Hay'adahan sare waxaa lala wadaagay xogta muslimiinta deeganka iyo xogta Maxkamadaha shareecada iyo baahiyahood waxaan laga dalbaday in gacan qabtaan maxkamadaha shareecada, iyadoo loo gudbiyay codsiyadan hoose:

- Codsiga in deegaanka loo dhiso Mac'hadka Tababarka Qaadiyada (mabda'iyana waa la aqbalay waxaana la inaga sugayaa dhulkii iyo qiimaha dhismaha]
- In culumada deeganka la siiyo deeq waxbarasho ee dhamaystiran { waa la daraaseynayaa waxaana jawaab laga sugayaa wakhtiga deeqaha waxbarashada }
- Tababarka 104 Qaadi in la tababaro { waa la aqbalay waxaan la fulinayaa 8,July 2013 / 01,Hamle 2015 }
- In Maamulka Maxkamada iyo qaybo ka mid ah qaadiyada laga bixiyo kharashka xajka { lama helin }

10. Safarka Djabuuti

Maamulka Maxkamadu wuxuu ka qayb galay Tababar iyo khibrad iswaydaarsi ay iska kaashadeen **Bankiga shabeele** iyo **Salaam Banki**. Kadib shirkii markuu dhamaday Maamulku waxay kullaan layeesheen iyagoo matalaya Maxkamada shareecada deeganka , **maamulka Mac'hadka** Tababrka Garsoorka Jabuuti , waxayna ku soo heshiiyeen sanadkan in 20 qaadi oo kamid ah Maxkamadaha shareecada tababar iyo khibrad isweydaarsi loo keeno dalka jabuuti mac'adkuna uu qaato masuuliyadeeda. (Waxaa la soo aqbalay sanadkan in la inoo tabaro 6 garsoore)

11. Qaabilaada wafdigi ka socday soomaali land

Bishii 12- 2014 waxaa soo booqday maxkamada guud ee shareecada DDS wafti ka socday soomali land gaar ahaan Maxkamada Gobalka Moroodi-jeex waxaana wafdigan hogaamin hayay gudoomiyaha maxkamada gobalka maroodi jeex.

Ujeedada socdaalka wafdigan ayaa ahayd khibrad is waydaarsi iyo in la iska kaashado awood Garsoorka Xuduud labada dal . Waxaa xusid mudan in hada ka hor hargaysa booqdeen wafti ka socday maxkamada guud ee shareecada.

12. Qaabilaada wafdi ka socday Jaamacada Africa Ee Dalka sudan

Bishii 12-2014 ayaa waxaa Soo booqday maxkamada Guud ee Shareecada DDS, wafdi ka socday **Jaamacada Caalamiga ah Africa Ee Dalka sudan** (International university of Africa) , waxaa kulan soo dhaweyana layeeshay masuuliyiinta ugu saraysa maxkamada Shareecada, masuuliyiinta Golaha saree arimaha islaamka garsoorka maxkamada iyo qaar kamid ah Ardaydii wax ka soo baratay dalka sudan gaar ahaan jaamacada weyn ee Afrika.

wafdigan ayaa imaanshihiisa ku sheegay inay u yimaadeen fulinta baraamij waxbarashoo ay xidhiidh kala yeesheen kulliyadda ilays ee magaalada Jigjiga oo markii hore bixin jirtay Fildhiyo kala gadisan, haatana bixin doonta fildhiyo ku saabsan Shareecada iyo luuqada caribga Qaanuunka iyo tababarro kala gadisan.

13. Waxyaabaha kale ee sanad miisaaniyeedkan qorshaysnaa lana fuliyay.

1. Iibka laba forci iyo hal bajaaja gobalada Afdheer, Jarar, Siti.
2. Iibka **Jena ratorka** xafiiska maxkamada Guud ee shareecada. DDS.
3. Waxaa qabsoomay mushruuca qalabaynta hoolka maxkamada guud ee shareecada
4. dhismaha xafiiska maxkamada Saree ee shareecada gobalka qoraxay oo hada (socada)

5. Waxaa la diyaariyay lana dhamays tiray habka geedi socodka dacwadaha ee shareecada.

14. Shaqooyin dheeri ah oo la hirgaliyay

1. Dood cilmiyeed ku saabsan xuquuqda dumarka oo ay soo jeedisay Sahra **mustafe** jaamicada AL- AZHAR. Ka diyaarisa master
2. Dood cilmiyeed ku saabsan qabiilka, qabyaalada, iyo saamayntooda iyo aragtiduu islaamku ka qabo. Soo jeediye Dr. baadiyow
3. Shirar wacyi galineed oo loogu talagalay in lagaga hor tago argagixisadii wadanka kusoo duushay.
4. Waxay maxkamadu ugu deeqday ciidanka dawladda deegaanka soo maalida lacag dhan ilaa labo milyan oo bir.